

## Adeeg warfaafin oo Afaf badan ku qoran



Wagtiga Qalalaasaha Cudurka Corona ayaa Hayada Dawlada Hoose ee Gobalka Fiyeena Qaybta u qabilsan Isdhexgalka iyo kala duwanaanshada waxay bixinaysa Adeeg wargelin ah oo ku baxaaya Afaf kala duwan.

Noogu soo dir Suaalahaaga ku saabsan marxalada Qalalaasaha Cudurka Corona, Afkaaga kowaad (Hooyo). Waxaan kaaga baaraynaa kanaalada ama ilaha lagu kalsoon yahay inay jawaab su,aalahaaga u hayaan iyo in kale, kadib waxaan kuu soo gudbinaynaa jawaabihii aan soo helnay oo ku qoran Afkaaga Hooyo.

### **Waxaad Su,aalahaaga ku soo qori kartaa Aaladaha Wargelinta**

- E-Mail: [post@ma17.wien.gv.at](mailto:post@ma17.wien.gv.at)
- Facebook: [startwien.at](https://www.facebook.com/startwien.at)
- Ama soo dir Telefoonkan: 014000 81540 (na soo wac ee oo noo sheeg Luuqada aad su,aashaada ku dhiibanayso. Qof ka tirsan Shaqaalaha hay, adayada (Lab ama Dhedig) ayaa si la hubo dib kuu soo wicaya)

### **Waxaynu shaqaynaynaa Waqtiyada kala ah**

Maalmaha: Isniinta ilaa Jimacada inta u dhaaxysa Saacadaha 9 ilaa 16.  
Waxaan isku dayaynaa in aan Su,aalahaaga Mudo 24 Saacdood gudahood ah uga soo jawaabno.

### **Kama jawaabi karno Su,aal kasta**

Shaqaalaha Qaybta Isdhexgalka iyo Kala Duwaanta ee Dawlada Hoose ee Fiyeena ma ahan qabiiri ku taqasusay Cudurka Corona. Waxaan isku taxalujinaynaynaa intay qaadataba in aan warbixin ka soo burqatay illo la hubo kuugu soo gudbino Luuqadaada koowaad. Haddii aysan jirin wax Jawaab ah oo ku haboon Su,aashada oo ku qoran illaha lagu kalsoon yahay kaama, siinkarno wax jawaab ah. Waan kaa Raali gelinaynaa.